
MA AHA OKEJ
Taageero la siinaayo qofka doonaaya inuu joojiyo naceyb iyo hanjabaad lagaga sameeyo internetka
NO HATE
NO HATE SPEECH MOVEMENT
Statens medieråd

# In lagaa ilaaliyo naceyb iyo hanjabaad lagaga sameeyo internetka

Xoriyadda hadalka ayaa ah mid ka mid ah qeybaha ugu muhiimsan Dastuurka Iswiidhan. Taas micnaheedu waxa weeye in cid kastaa ay hesho fursada ay ku fikireyso, rayigeeda ku dhiibaneyso oo ay ku odhaneyso waxa ay rabto inay tidhaahdo - hadal ahaan ama qoraal ahaanba, ilaa iyo inta sharciga la raacaayo. Taasi waa waxa aasaaska u ah dimuquraadiyada.

Internedka waxa ka shaqeynaaya sharciyo la mid ah kuwa banaanka. Naceyb iyo hanjabaad ayaa noqon kara sharci darro. Waa shaqada booliiska iyo xeer ilaaliyaha si ay ugu go'aamiyaan haddii danbi la galey.

"Marna ma ah OKAY in la faafiyo naceyb. Xataa baraha bulshada toona"

"Waa muhiim in la helo fikrado kala duduwn oo bulshada dhexdeeda. Waxaan anigu xaq u leh fikirkeyga"

# Tusaale ka mid ah denbiyada khuseeya naceyb iyo hanjabaad laga sameeyo internetka

**Wax xun cid ka sheegid**
Wax xun cid ka sheegid micnaheedu waxa weeye in warbixin qof ku saabsan lagu faafiyo dadka kale si sumcada qofkaas loogu dhaawaco.

**Aflagaadeyn/Xasaradeyn (Ofredande)**
Aflagaadeyntu waa quudhsi, yasid ama ku jeesjeesid qof lagu sameeyo taas oo ulajeedadeedu ay tahay ku xadgudub qiimaha qofka ama sharaftiisa.

**Dhibid (Ofredande)**
Dhibid waa in si xun oo soo noqnoqota oo kas ah qof kale loogu qashqasho.

**Xadgudub galmada**
Xadgudub galmadu waxa weeye in qof kale galmo lala yeesho iyadoo taasi ay qofka kale rabitaankiisa lid ku tahay.

**Hanjabaad sharci darro ah**
Hanjabaada sharci darrada ahi waa hanjabaad ah in qof loo geysto dambi iyada oo taas ujeedadiisu tahay in qofka la cabsi geliyo.

**Sawir qaadis meel ka dhaca ah**
Sawir qaadis meel ka dhaca ahi waa in iyadoo aan ogolaansho la haysan si qarsoodi ah qof loogu sawiro ama fiidyow looga duubo guri gudahiis, tusaale ahaan xamaamka/qolka qubaysiga ama musqusha dhexdiisa.

**Ku xadgudubka sharci darrada ah ee asturnaanta**
Ku xadgudubka sharci darrada ah ee asturnaanta waa faafinta sawirrada ama macluumaadka ku saabsan qof, haddii ujeedada faafintu ay tahay in dhaawac loo geysto qofka ay sawirada ama macluumaadku khuseeyaan.

**Nacayb dad gaara ku wajahan**
Nacayb dad gaara ah ku wajahani waa in si cad loo faafiyo hadalo hanjabaado ah ama yasaaya/quudhsanaaya koox dad ah, taas oo lagu saleynaayo jinsi, midabka jidhka, asalka ama qowmiyadda, diinta/caqiidada ama nooca galmada.

**Laga soo xigtey:** Åklagarmyndigheten, Polisen, Myndigheten för ungdoms- och civilsamhällesfrågor, Brottsbalken.

# Miyaa adiga internedka lagaaga geystey naceyb iyo hanjabaad?



• **Waxa dhacay u sheeg qof** aad ku kalsoon tahay. Macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga jooga ayaa masuuliyadi ka saaran tahay inay adiga ku caawiyaan markaad adigu ardey ahaan waxyeelo laguu geysto.

• **Dacwad Booliis samee!** Taana toos u samee. Mararka qaarkood ayaa booliisku doonayaa inuu helo macluumaad laga soo qaadaayo shirkadaha internedka oo keydsan kara sawir, faalo iyo wax la soo dhigay muddo gaaban oo kaliya. Waxaad denbiga ka soo sheegeysaa **11414**.

• **Dacwada ka so gudbi adigoo bogga internedka soo maraaya!** Waxaad macluumaadka xiriirka ee qofka leh domain-ka ka helaysaa whois.com.

• **Cadeyn keydso!** Ku sawir kombiyuuterka sawirka, faalada ama dooda/odhaahda. Weydiiso qof kugu dhow inuu eego cadeynta markaad keydsato. Haddii arinku uu maxkamad gaaro ayaa qofkaasi markhaati ka noqon karaa inaan cadeyntu waxba laga bedelin iyadoo Photoshop la isticmaalaayo. Soo daabac oo dhijitaal ahaan u hay waxyaalaha caddeynta. Qof saaxiib ah weydiiso inuu kuu keydiyo haddii aadan dooneynin inaad adigu sameyso.

**"Markii saaxiibkey dhibaato looga geystey interneka ayaanu dacwad ka gudbiney taas"**



# Miyaad adigu aragtay dad kale oo geystey naceyb iyo hanjabaad?

- **Waxa dhacay u sheeg qof** aad ku kalsoon tahay. Macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga jooga ayaa masuuliyadi ka saaran tahay inay marka ardey waxyeelo loo geysto:

- **Marna ha saarin "like" oo hana sii gudbin wax** qoraal ah iyo sawirro gacan ka geysanaaya naceyb iyo hanjabaad!

- **Dacwada ka so gudbi adigoo bogga internedka soo maraaya!** Waxaad whois.com ka heli doontaa macluumaadka lagala xiriiraayo qofka leh domayn-ka.

NO HATE

# Halkan ayaad ka heli kartaa macluumaad, kaalmo iyo caawimo.

**Barnombudsmannen.se**
Halkan waxa ku jira aqoon iyo macluumaad ku saabsan ilmaha/caruurta iyo dhalinta yaryar xuquuqdooda. Barnrättsmyndigheten waxay carruurta iyo dhalinyarada kala hadlaan sida ay dareemayaan iyo waxay ku fikirayaan. Qeybo boggu ka mid ahi waxa ku qoran yihiin luqado badan.

**Bris.se**
Hay'ad taageerta oo caawisa carruurta khatarta ku jirta/nugul iyo dhalinyarada. Halkan waxaad si qarsoodi ah ula hadli kartaa la taliye iyadoo telefoonka, chatt-ka ama emayl la soo maraaya. Bogga waxa ku yaala macluumaad ku qoran luqado kale iyadoo loo adeegsanaayo tarjumaadda Google.

**Brottsoffermyndigheten.se**
Hay'ad ka shaqeysa si ay carruurta iyo dhalinta uu danbi soo gaadhay xaaladooda looga wanaajin lahaa. Waxa bogga jagvillveta.se/sprakversioner ku yaala macluumaad ku qoran luqado kala duduwan oo ku saabsan waxa dambi ah iyo halka aad ka heli karto caawimaad. Waxa bogga tystnainte.se ku yaala macluumaad iyo talooyin loogu talagalay dadka loo geystey naceyb iyo hanjabaadyo maadaama oo ay si furan fikirkooda u cabirayaan. Tusaale ahaan, suxufiyiinta, dadka dadka saameeya iyo siyaasiyiinta. Tystna inte waxa lagu heli karaa Iswiidhish.

**Juridikinstitutet.se**
Hay'ad sharci taas oo caawineysa dadka loo geysto naceyb iyo hanjabaad laga sameeyo internedka. Halkan ayaad ka weydiin kartaa su'aalo ku saabsan naceyb iyo hanjabaad, denbi iyo ciqaab. Qeybo ka mid ah ayaa ku qoran af Ingriisi.

**Mucf.se**
Hay'ad faafisa macluumaadka ku saabsan sida dhalaanku ay dareemayaan. Boggu waxa uu ku qoran yahay af Iswiidhish iyo Ingriisi.

**Rfslungdom.se**
Ururka u adeega khaniisiinta, dadka galmo la sameeya labada jinsiba, kuwa jinsigooda bedela iyo queeras-ka xuquuqdooda. Halkan waxaad ka helaysaa caawimo iyo talooyin loogu talagalay dhalinyarada dadka-hbtqga. Boggu wuxuu ku qoran yahay af Iswiidhish.

**Raddabarnen.se**
Hay'ad ka shaqeysa xuquuqda dhammaan carruurta si ay ugu noolaadaan, ugu horumaraan oo ay ugu koraan bay'ad nabdoon. Halkaan waxyaabaha laga helaayo waxa ka mid ah aqoon iyo talooyin loogu talogalay qofka dhalinyarada ah, waalidka ama cida la shaqeynaysa ama u shaqeeya carruurta. Boggu waxa uu ku qoran yahay af Iswiidhish.

**Skolverket.se**
Hay'ad masuul ka ah inay hagto oo ay taageerto xanaanooyinka, dugsiyada iyo waxbarashada dadka waaweyn ee Iswiidhan. Halkan waxad ka helaysaa macluumaad la soo ururiyey oo ku saabsan naceybka iyo dhibaateynta laga sameeyo internetka. Qeybo bogga ka mid ahi waxay ku qoran yihiin luqado badan.

**Statensmedierad.se**
Hay'ad ka shaqeysa si ay u taageeraan carruurta iyo dhalinta ku jira internedka. Hay'adda wada ololeha No Hate Speech Movement si looga hortago naceybka iyo hanjabaadda internetka ay carruurta iyo dhallinyaradu ka sameeyaan. Qeybo boggu ka mid ahi waxa ku qoran yihiin luqado badan.

**Tänk till**
Sheekooyinka dhalinyarada oo ku dhigan Iswiidhish ee mowduucyada ku saabsan sida muuqaalka jirka ee lagu deydo, fikrad xun ka haysasho wax iyo welwel/cabsi badan. Fikir ka dhiibo waxay ku jirtaa baraha bulshada waxaana soo saara UR taas oo ah qeyb ka mid ah adeega bulshada. Boggu waxa uu ku qoran yahay af Iswiidhish.

**Ungdomar.se**
Bogg aad kala hadli karo, oo aad su'aalo weydiin karto dadka waaweyn oo xirfadleyda ah iyadoo aan magacaaga la sheegin. Boggu waxa uu ku qoran yahay af Iswiidhish.

**Youmo.se**
Bogg ku qoran luqado badan oo loogu talogalay qofka 13 ill 20 sanno jirka ah. Halkan waxa ku yaala macluumaad ku saabsan waxyaalaha ay ka midka yihiin daqaalka iyo dulmiyada, caafimaadka maskaxda, jidhka iyo galmada. Boggu waxa uu ku qoran yahay af Iswiidhish, Ingriisi, Carabi, Dari, Soomali iyo Tigrey.

## Halkan ayaad ka soo ashkatayn/sheegi kartaa
## Nacaybka iyo hanjabaada waxaanad ka helaysaa warbixin/macluumaad

**Polisen.se**
Hay'ad ka shaqeysa inay dambiyada joojiso oo dadkana ka ilaalisa inay dambiyo soo gaaraan. In la ilaaliyo carruurta iyo dhalinyarada internedka ku jirta ayaa qeyb ka mid ah shaqadan. Boggu waxa uu ku qoran yahay luqado badan.

**Beo.skolinspektionen.se**
Wakiilka- carruurta iyo ardayda (Barn- och elevombudet ama BEO) waxay ka shaqeeyaan sidii loo ilaalin lahaa xuquuqda carruurta iyo ardayda.
BEO waxay baaritaan ku sameysaa dacwadaha la soo gudbiyo ee ku saabsan xadgudubka carruurta iyo ardayda iyagoo carruurta iyo ardayda ku matali kara maxkamadda. Boggu waxa uu ku qoran yahay luqado badan.

**Do.se**
Hay'adda Diskrimineringsombudsmannen waxay ka shaqeysaa in la helo bulsho aan takoorid laheyn (marka qof loola dhaqmo si ka xun sida dadka kale). Haddii qof uu jabiyo Sharciga u yaala takoorka, ayaad DO u soo sheegi kartaa. Boggu waxa uu ku qoran yahay luqado badan.

Internedka ka dhigeysa meel ka fiican


Nordiska
ministerrådet
WWW.STATENSMEDIERAD.SE